

QIIMEYNTA SINNAANTA SSA IYO TAXLIILINTA BAAHIYAHA

Waaxda-maamulka	Adeegyada Caruurta
Goobta Adeega	Waxbarasho
Adeega/siyaasada/shaqada la qiimeynayo	Wakhtiga la qorsheeyay in la xiro Dugsiga Hoose ee Broadwater
Tuulooyinka ama degmooyinka uu adeegan ama siyaasadan taabaneysa	Wandsworth
Shaqaalaha ku lugta leh horumarinta EINA	Adam Wells
Taariikhda ay ansixinayaan Kooxda Sinnaanta ee Maamulka (hadii ay suuragasho ayadoo ay la eegayo duruufaha)	
Taariikhda la Ansixinayo Siyaasada Dibna uu u eegayo Maamulaha Dhamaan EINA waa in Siyaasadu Ansixisaa oo u Dib u eegaa Maamulka.	7 ^{ka} October 2022
Taariikhda loo soo gudbinayo Gudida Maamulka	

1. Soo koobid

Ka dib tixgelin taxaddar leh, Golaha Wandsworth wuxuu qaatay go'aanka adag si uu ugala tashado soo jeedinta lagu xirayo Dugsiga Hoose ee Broadwater Muddada Xagaaga ee 2023, iyadoo la doonayo in dib loogu sameeyo goobta Dugsiga Baahiyaha Gaarka ah. Hadii furitaanka Dugsiga Baahiyaha gaarka ah la ansixiyo, tani waxa ay keenaysaa in la helo ku dhawaad 190 goobood fursadna ka helaan ardayda qaba baahiyaha gaarka ah taas oo ah arin ay degmadu aad ugu baahantahay.

Soo jeedintan waxa horseed ka ah hamigayada wadajirka ah ee carruurta leh SEND si loo daboolo baahiyahooda gudaha, iyaga oo ku dhowaynaya qoysaskooda iyo asxaabtooda iyo baahida loo qabo in la ilaaliyo nidaam dugsi oo waara.

Ayada oo ay ugu wacan tahay baahida aadka ah ee loo qabo goobaha waxbarashada gaarka ah, dugsigeeni hore ma jirto awood kale oo ku filan uu adeeg ku bixiyo, waxaan fasax u heysanaa goobo kale inaan raadino oo ka baxsan Wandsworth kuwaas inta badan ah iskuulada madaxa banaan. Sidaa darteed, xiligan waxaan jirta in inta badan dadkeena da'yarta ee qaba SEND iney u socdaalaan masaafo aad uga fog guryahooda iyo bulshadooda si ay iskuulo u tagaan oo ay wax u soo bartaan.. Arintaasi waxa ay keenaysaa saameyn dhaqaale oo ay ku keenaysaa caruurta, qoysaskooda iyo schooladana maxaliga ah.

Baahida aan u qabno iskuul dheeraad oo bixya SEND ayaa timi oo ku soo beegantay ka dib markii tirada ardayda caadiga ah ee wax ka dhigta dugsiyada hoose ee london ay hoose ay u dhaceen taas oo ay ku jirto Wandsworth. Arinta hoos u dhaca ardeyga caadiga ah ayaa waxa keenay ka dib markii qoysas badan ay ka guureen magaalada ayada oo ay ugu wacan tahay Brexit iyo saameynta cudurka safmarka ah taaso keentay goobo iskuul oo dheeraad ah.

Si wax looga qabto labadan arrimood, waxaa nalooga baahan yahay inaan qaadno tallaabo adag oo aan si halabuur leh u fekerno si aan u hubinno awoodda SEND takhasuska dheeraadka ah ee lagama maarmaanka ah, iyo sidoo kale yareynta boosaska dheeraadka ah ee dugsiyada ee qaybta hoose. Soo jeedinta ah in dib looga faaideysto goobta waxbarashada ee Broadwater waa in la xaliyo labada u jeedo. waana muhiim in gudida ay si fiican u fahmaan in u jeedada kaliya loo qoray codsiga iyo soo jeedintan ay arinta tahay, wax xidhiidh ahna lama lahan soo jeedinta codsigan tayada wax dhigista, shaqaalaha iyo hogaanka iskuulka.

Waxaa inaga go'an inta aan ku jirno hawshan la tashiga ah inaan idin dhageysano, oo aan sameyno aanan eegno aragtiyaha iyo waliba walaaca ay qabaan dadka ay saameysay iyo inaan idin siino faahfaahino iyo dib u xaqiijin si aan u yareyno qatar iyo isbadal kasta oo mustaqbalka yimaada. Waan fahansanahay in soo jeedintan iney qasbiyan saameynayso caruurta, waalidiinta, macalimiinta iyo bulshada kale ee dugsiyada hoose ee Broad water laakiin hadana waxanu ognahay oon qiraynaa in soo jeedin walba oo la soo jeediyo in aaney heleynin taageero dhamestiran oo buuxda. Go'aanka aadka u adag ee aan sahlaneyn waxaanu u qaadnay si aan u daboolno baahida aadka u badan ee caruurta iyo qoysaska ku nool Wandsworth..

EINA waxa ay xaqiijinaysa oo ay ogaatay in qorshaha xidhisto dugsiyada uu saameynayo ardayda hada dhigta dugsiyada.. Maadaama ardayda BME aad loogu matalo marka la barbardhigo tirakoobka 2011 ee maamulka degmada tani waxa ay saameyn taban ku yeelanaysaa ardayda BME Si loo yareeyo saameynta uu ku yeelanayo codsadayasha maxaliga ah, gudida waxa uu laf ahaantisa hubiyay iney jiraan goobo maxali ah oo loogu tala galay ardayda hada dhigata iyo kuwa kale ee mustaqbalka Soo jeedinta waxa ay xidhiidh la leedahay soo jeedin kale oo dib looga isticmaalayo goobta dugsiyada laguna xaqiijinayo waxyaalaha dheeriga ah ee SEND taasi oo dhalinaysa kuna yeelanaysa saameyn wanaagsan ardeyda SEND.

Soo jeedinta waxa ay ku xidhantahay la tashi sida dastuurku qabo EINA waa la casriyeyn doona laguna dari doona wax walba oo dheeri ah oo soo baxa.

2. Cadeymo ururin iyo qorshayaal

a. Cadeyn nooce ah ayaa loo isticmaalay qiimeyntan? Tusaale ahaan, xogta qaranka, xogta maxaliga ah ayadoo loo sii marayo Datarich ama Data Wand.

Cadeyn	Ilaha
--------	-------

Xogta da'da	Tirakoobka dugsiga ee May 2022. Xogta diiwaangalinta gudida
Naafo	Tirakoobka dugsiga ee May 2022. Xogta Gudida SEND
Jinsi	Tirakoobka dugsiga ee May 2022.
Sinji/Qowmiyad	Tirakoobka dugsiga ee Janaayo 2022. Xogta tirakoobka qaranka ee 2011 (ayadoo loo sii marayo Xogta Wand)
Diinta iyo Amiinsanaanteda	Xogta tirakoobka qaranka ee 2011 (ayadoo loo sii marayo Xogta Wand)

b. Yaad la qabatay ood kala tashatay ama kaala qeyb qaatay qiimaynta?

Soo jeedinta waxa ay u xidhnaan doontaa laba la tashi. mid la sameynayo daabacaada ka hor iyo mid afar todobaad oo dheeraad ah taas la socota. sida xeerka soo jeedinta uu dhigayo.

3. Taxliilinta loo baahan yahay

Saameynta suurogalka ah oo ay ku yeelanayso dadka ama kooxda dagan iyo talaabooyinka la qaadayo si loo yareeyo saameynta loona horumariyo oo loo helo cadaalad, kala duwanaan iyo mid loo dhan yahay

dadka ama kooxda la difaacay	Xaqiiqoyin
Da'ada	<p>Dugsiga waxa uu siinayaa goobo waxbarasho caruurta da'doodu tahay sadex sano ilaa 11 sano jir..</p> <p>Dugsiga waxa uu helay 137 caruur ah oo u soo dhoweeyay shan ka mid ah caruurta waxa saameynaya xidhista dugsiga hoose Broad water dhamaadka xili dugsiyeedka 2022/2023</p> <p>Shaqada diyaarinta waxay soo jeedinaysaa ku filnaanshaha boosaska dugsiyada deegaanka ee leh 324 boosas oo ka banaan 0-1km guriga ilaa masaafada dugsiga iyo 622 boosaska banaan ee 0-1.5km guri ilaa dugsi inta u dhaxaysa Rec-Sano 5.</p>
Naafo	<p>6 (4%) caruurta Broadwater waxa ay qabaan EHCP 1 ilmo oo kaliya ayaa ka hooseeya qiimaynta. 4 ka mid ah 6 caruurta leh EHCP waxa ay leeyihiin walaalo, waanan tixgalin doonaa marka aan wadno qorshaha diiwaangalinta. Dookha iyo rabitaanka dugsiga waa lagala munaaqashooday qoysaska taasina waxa ay keentay noocyo kala duwan oo dugsiyo ah. Kaliya 1 waalid ayaa codsanaya dugsi aanan u dhoweyn.taasi waxa ay saameyn yar ku yeelanaysaa gaadiidka.</p> <p>Marka la eego tirakoob la sameeyay May 2022,sidoo kalena lagu daro 14% ardayda dugsiga ayaa helay taageerada SEN. Qeybta</p>

	ardeyda ee qabta EHCP islamarkaana heshay taageerada SEN waxa ay la mid yihiin dhamaan ardeyda dugsiyada ee ku yaala Wandsworth kuwaas oo ahaa 4% ilaa 14% bishi May.																		
Jinsi	Marka la eego tirakoobka bisha May ee 2022, jaangoynta ardayda ayaa ah 52% waa dhedig halka 48% ay yihiin lab.. Tani waxa ka dhigantahay celceliska ardayda degmada ay yihiin 50% lab iyo 50% dhedig.																		
Dib u magacaabida Jinsiga	N/A																		
Guurka iyo isuguurinta madaniga	N/A																		
Uur iyo xiliga hooyanimada	N/A																		
Sinjiga/qowmiyada	<p>Janaayo 2022 qeybinta la qeybiyay qowmiyadaha ay ka soo kala jeedaan ardayda dhigata Dugsiga Hoose ee Broadwater iyo dhamaan dugsiyada kale ee Wandsworth waxa ay ahaayeen sida soo socota:</p> <table border="1"> <thead> <tr> <th></th> <th>Broadwater</th> <th>Dhamaan dugsiyada hoose</th> </tr> </thead> <tbody> <tr> <td>Eeshiyaan ama Eeshiyaan Biritish ah</td> <td>38%</td> <td>16%</td> </tr> <tr> <td>Madow ama Madow Biritish ah</td> <td>15%</td> <td>17%</td> </tr> <tr> <td>Isku jir</td> <td>12%</td> <td>15%</td> </tr> <tr> <td>Cadaan</td> <td>24%</td> <td>45%</td> </tr> <tr> <td>Wax kale ama Kuwa kale</td> <td>6%</td> <td>5%</td> </tr> </tbody> </table> <p>Tani waxa ay is barbardhig ku sameyneysaa kala jajabinta qowmiyadaha ee Maamulka xaafada Tooting Broad way (Meesha uu dugsiga ku yaalo) iyo degmada Wandsworth marka la eego tirakoobka qaranka ee la sameeyay 2011 waxa ay noqotay sidan soo socota:</p>		Broadwater	Dhamaan dugsiyada hoose	Eeshiyaan ama Eeshiyaan Biritish ah	38%	16%	Madow ama Madow Biritish ah	15%	17%	Isku jir	12%	15%	Cadaan	24%	45%	Wax kale ama Kuwa kale	6%	5%
	Broadwater	Dhamaan dugsiyada hoose																	
Eeshiyaan ama Eeshiyaan Biritish ah	38%	16%																	
Madow ama Madow Biritish ah	15%	17%																	
Isku jir	12%	15%																	
Cadaan	24%	45%																	
Wax kale ama Kuwa kale	6%	5%																	

		Tooting Broadway Ward	Degmada Wandsworth
	Eeshiyaan ama Eeshiyaan Biritish ah	25%	11%
	Madow ama Madow Biritish ah	15%	11%
	Isku Jir	5%	5%
	Cadaan	51%	71%
	Wax kale (ama kuwa Kale)	3%	2%
Diinta iyo mabda'a, oo ay ku jirto waxyaabaha aad rumeysantahay	<p>Xogtan lagama soo ururin tirakoobka dugsiga</p> <p>Dugsiga Broad water waa dugsi aanan u xadidney diimo gaar ah. waana dugsi hoose oo bulshada ka dhaxeeya loona siman yahay Goobaha iskuulka waxaa loo qoondeeyaa ayadoo la raacayo habraaca qaadasahada iyo diiwaangalinta ee dugsiyada bulshada ayadoo aanan loo eegeyn caqiido gaar ah ama diin..</p> <p>Xogtan lagama soo ururin tirakoobka dugsiga. Si kastoo ay ahaataba tirakoob la sameeyay sanadkii 2011 ayaa lagu ogaaday in 42% dadka degan xaafada Tooting ay ahaayeen Christan. 17% waxa ay ahayeen Muslimiin, 7% waxa ay aaminsanyeen diinta hindusga halka 25% ay ahaayeen dad aanan wax diimo ah rumeysneyn.</p>		
Nooca jinsiga ee qofka soo jiita lab ama dhadig	N/A		
Dhamaan Kooxda i.e ka weyn waa LGBT ama madow. ama asian ama dadka laga tirada badan ah waana dad dhalin yaro ah.	N/A		

Xog banaan

Xogo banaan	Sidee tan loo xalin doonaa
N/A	N/A

4. Saameynta

Kooxda la ilaaliyay	Togan	Taban
----------------------------	--------------	--------------

<p>Da'ada</p>	<p>Ayadoo la eegayo xeerka diiwaangalinta dugsiga, goobaha dugsiga waxaa loo qoondeeyay ayadoo la isticmaalayo habraaca diiwaangalinta. Isbadalada la soo jeediyay waxa ay xidhiidh la leeyihiin caruurta iyo dadka da' yar ee dastuurka dhigayo iney gaadheen da'da waxbarashada. Diiwaangalinta dugsiyada waa nidaam taas oo ku hoos shaqeeyo qaab dhismeedka dastuurka. Wandsworth waa qeybta maamulka ee diiwaan galinta una adeegta dugsiyada bulshada. waxana jira nidaamyo iyo habraacyo loo diiwaangaliyo ardeyda loona xanaaneyo ardayda dugsiyada caadiga ah.</p> <p>Waxaa jira goobo ku filan oo ku wanaagsan dugsii maxali ah oo ay daga karaan arday isku sanadka ah 85% waxa ay tagaan masaafo gurigooda u jirta 1km halka 97% ay u tagaan 1.5 km. Wakhti xaadirkan, kaliya 19% oo ah ardayda isku heerka ayaa ku nool 1km oo ah gudaha dugsiga.</p>	<p>Xidhid kasta oo la xidho dugsii taas oo keenaysa in wabarashada ilmaha ay ku timaado isbadal waxa ay keenaysaa in la carqaladeeyay waxbarashada ardayga.. Si kastoo oo ay haataba si looga hortago arintaa iyo saameynteeda waxaanu la shaqeyn doonaa shaqaalaha anagoo kala shaqeyneyna qorshaha kala guurka dugsiga cusub si loo hirgaliyo fursado waxbarasho oo togan. Xidhitaanka sidoo kale waxa laga yaaba inuu saameeyo caruurta walaalaha ah ee ardayda ah hadii ay ugu tala galeen iney dugsii wada dhigtaan. Gudida waxa uu hubinayaa in ay jiraan adeegyo munaasib ah oo loo diyaariyay loona qorsheeyay ardayda la soo wareeyiyay ama la so badalay Waxa ay hubinayaan oo ay xaqiijinaayan in doorashada waalidka iyo duruufaha ku geedaaman qoyska sida caruurta walaalaha ah in uu tixgaliyo si loo yareeyo saameyn kasta oo suuragal ah oo qoysaska taabaneysa.</p> <p>Si loo yareeyo saameynta ay ku yeelanayso codsadayasha maxaliga ah, gudida waxa ay sidoo kale xaqiijisay iney jiraan goobo ku filan oo deegaanka maxaliga ah oo loogu talo galay ardayda hada dhigata dugsiga iyo kuwa kale ee mustaqbal la sadaalinayo.</p> <p>Waalidiinta waxa ay sidoo kale xaq u yeelanayaan racfaan, ayagoo ka qaadanayo gudi ama panel racfaan oo madax banaan.</p>
----------------------	--	--

		Soo jeedinta marwalba waa mid ku xidhan la tashi uu dastuurku ama xeerka qabo.
Naafo	<p>Caruurta iyo dadka da' yarta ee qaba baahiyaha gaarka ah ee waxbarasho ama naafada ah waxa la siinayaa ahmiyad iyo muhiimad gaar ahaan hab raaca diiwaanglinta ama iney ka qeyb galaan adeega waxbarashda ee gaarka ah. Nidaamka lagu siinayo waxbarashada caruurta qabta EHCP waxaa lagu maamulayaa ayadoo loo sii marayo adeega qiimaynta waxbarashada gaarka ah. dhamaan dugiyada waxaa laga doonayaa oo looga baahan yahay iney diwaangaliyaan hadii ilmo uu soo magacagabo ama doorto EHCP..</p> <p>Soo jeedinta waxa ay xidhiidh la leedahay soo jeedin kale oo dib looga isticmaalayo goobta dugsigao laguna xaqiijinayo waxyaalaha dheeriga ah ee SEND. taasi oo dhalinaysa kuna yeelanaysa saameyn wanaagsan ardeyda SEND.</p>	<p>6 caruur ah oo ku sugan Broadwater ayaa qaba EHCP halka 1 mid oo caruurta ka mid ahna uu ka hooseeyo qiimaynta. Afar ka mid ah lixda caruurta ah waxa ay leeyihiin walaalo.waxaana aan ku darsan doonaa qorshayaashena tixgalina waan siin donaa. Dookha iyo doorashada dugsigu waan la qorsheynay oon kala hadalnay qoysaska tanina waxa ay keentay iney iskuulo badan soo baxaan.. Kaliya hal waalid ayaa waxa uu codsanayaa iskuul aanan u dhoweyn sidaa darteed tani waxa ay saameyn yar ku yeelanaysaa gaadiidka.</p>
Jinsiga	<p>Tan ug sareysa ayaa ah in caruurta loo qoondooyey goobo waxbarasho lana raaciyay Xeerka Diiwaangalinta.. Isbadalda la soo jeediyay kaliya kuma koobna jinsiga Goobaha waxaa loo qoondeeyay ayadoo aan tixgalin la siineynin nooca jinsiga ee qofka.</p>	Lama aqoonsan
Dib u magacaabida jinsiga	n/a	
Guurka iyo Xidhiidhka guurka madaganiga ah	n/a	
Uurka iyo xiliga hooyanimada.	n/a	

<p>Sinjiga/Qowmiyada</p>	<p>Nidaamka diiwaangalinta, sida ku xusan xeerka diiwaangalinta qaranka iyo sharciga cadaalada, waxa loo qoondeeynayaa goobaha iskuulka ayadoo aanan la tixgalinaynin lana eegeynin sinjiga ama qowmiyada qofka.</p>	<p>Soo jeedinta xidhista dugsiga waxa ay saameyneysaa ardayda wakhtigan dugsiga dhigata. Maadaama ardayda BME ay ugu badan yihiin ardayda dugsiga tani waxa ay si gaar ah saameyn ugu yeelan doontaa ardeyda BME.</p> <p>Si loo yareeyo saameynta ay ku yeelanayso codsabayaasha maxaliga ah, gudida waxa ay sidoo kale xaqiijisay iney jiraan goobo ku filan oo deegaanka maxaliga ah oo loogu talo galay ardayda hada dhigata dugsiga iyo kuwa kale ee mustaqbal la sadaalinayo. Waxaa jira goobo ku filan oo ku wanaagsan dugsi maxali ah oo ay dagi karaan arday isku sanadka ah 85% waxa ay tagaan masafo gurigooda u jirta 1km halka 97%ay u tagaan 1.5 km. Wakhti xaadirkan, kaliya 19% oo ah ardayda isku heerka ayaa ku nool hal km oo ah gudaha dugsiga ah.</p> <p>Waalidiinta waxa ay sidoo kale xaq u yeelanayaan racfaan, ayagoo ka qaadanayo gudi ama panel racfaan oo madax banaan.</p> <p>Soo jeedinta marwalba waa mid ku xidhan la tashi uu dastuurku ama xeerka qabo.</p>
<p>Diinta iyo mabda'a, oo ay ku jirto waxyaabaha aanad aaminsaneyn</p>	<p>Xidhitaankani kama dhalanayso mana keenayo hoos u dhaca dugsiyada diimaha ee goobta ka yaala.</p> <p>Waxaa jira goobo badan oo ku filan oo ah dugsiyo aan xidhiidh la laheyn ama u xadidnayn diimo iyo sidoo kale iskuulo dhowr ah oo diimaha la</p>	

	xidhiidha taaso waalidiinta xiisanaysa ay tagi karaan.	
Nooca jinsiga ee qofka soo jiita lab ama dhadig	N/A	

5. Talaabooyinka lagu horumarinayo cadaadlada, kala duwanaanta iyo ka qeyb galka.

Talaabo.	Sarkaalka hogaaminaya	Wakhtiga kama dambaysta ah.
La shaqeynta SENCO si loo tixgaliyo doorashada dugsiga loona hubiyo in meel munaasib ah lagu qoro caruurta qabta EHCP.	Deborah Johnson	July 23

6. La tashi dheeraad ah (waa qeyb ikhtiyaari ah - u dhameystir sida ugu haboon)

Qorshaynta la talinta	Taariikhda la talinta iyo tashiga
La talinta Daabacaada ka hor	12 October ilaa 29 November 2022
4-todobaad oo ah matalaada xeerka dhigayo ('la talin rasmi ah') - (hadii gudiga uu go'aansado inuu horey u sii wado la talinta dabacaada ka horeysa)	Janaayo 2023